



REF: 1/HAN/ 1-0230

May 25-2012

Ku: Mudane Cabdiraxman Mohamed Cabdilaahi (Cirro)

Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda JSL

=Hargeysa=

OG: H.E. Ahmed Mahamed Mahamoud

M a d a x w e y n a h a JSL

=Hargaysa=

### **UJEEDO:WAR-BIXINTA XISAAB-XIDHKA 2008**

#### **Mudane Gudoomiye,**

Tixraac warqadaada sumadeedu ahayd GW/04/95/2011, ee 04/10/2011 kuna saabsanayd Xisaab-xidhada Miisaaniyaddaha sanadaha 2007, 2008, iyo 2009.

Anagoo fulinayna dhamaan Qodobada sharci ee waajibinaya Xisaab-xidhka Miisaaniyadda, Waxa aanu si Xushmad iyo Qadarinba leh kuugu sheegaynaa, in sida aad la socotid Xisaab-xidhada Miisaaniyadda aan kor ku soo sheegnay ahaa mid muddo dhaafay, oo naga horeeyey kuna beegnaa mudadii xukuumadii hore.

Hadaba anagoo fulinayna codsiga Golaha Wakiiladda JSL ee ku caddaa warqadaada aanu sumadeeda kor ku soo sheegnay, waxa aanu halkan kuugu soo gudbinaynaa war-bixinta hant-dhawrka guud ee xisaab-xidhka Miisaaniyadda sanadka 2008, oo ah sidan soo socota:-

**Mahamoud Aw Abdi Ibrahim**

**Hanti-Dhawraha Guud Ee Qaranka JSL**

## **A. DAKHLIGA GUUD EE 2008**

Dakhliga Guud ee ku tala-galka Miisaaniyadda Caadiga ee 2008, wuxuu dhamaa SL SH **280,610,081,921**. Dakhliga dhabta ah ee Miisaaniyadda caadiga ah ee soo xarooday, sanadka 2008, wuxuu dhamaa SL.SH **233,103,883,883**. Sida ku faahfaahsan qaybaha soo socda ee warbixintan.

### **IS-BARBARDHIGA DAKHLIGA 2008,**

<b>madaxa</b>	<b>Nooca</b>	<b>Ku tala-galka</b>	<b>Dakhliga dhabta ah</b>	<b>faraqa</b>
1.1.0	Cashuurta isticmaalka dhaqdhaqaaqa	205,431,397,953	204,135,025,732	(-)1,296,372,221
1.2.0	Cashuurta wax soosaarka	325,118,620	295,568,000	(-) 29,550,620
1.3.0	Cashuurta dakhliga	23,983,661,347	11,663,503,454	(-)12,320,151,893
3.1.0	dakhliga Hantida Dawlada	33,158,438,672	6,949,139,486	(-) 26,209,298,686
4.1.0	Dakhliga alaabta iyo Hawsha	17,711,465,329	10,060,640,711	(-)7,650,824,618
<b>Total</b>	<b>Isku geynta</b>	<b>280,610,081,921</b>	<b>233,103,883,883</b>	<b>(-)47,506,198,038</b>

## **B. KHARASHKA GUUD EE 2008**

Ku tala-galka kharashka Guud ee Miisaaniyadda 2008, wuxuu dhamaa SL Sh **280,610,081,921** Kharashka dhabta ah ee baxay sanadka 2008, wuxuu dhan yahay SLSH **247,711,179,723**. taasoo ka yar ku tala-galkii guud ee kharashku lacag dhan SLSh **32,898,902,198**. Sida ku cad faah-faahinta bogaga soo socda.

## **C. XISAABAADKA KA BAXSAN MIISAANIYDA CAADIGA AH EE 2008**

Lacagaha Dakhliga iyo kharashka ee Xisaabaadka Miisaaniyadda ka baxsan (below the line of Accounts) ee sanadka 2008, waxay Guud ahaan kala ahaayeen sidaa hoos ku kala qoran:

**Xisaabaadka ka Baxsan Miisaaniyada Caadiga ah**

<b>s/n</b>	<b>Nooca</b>	<b>Dhakhli</b>	<b>kharash</b>	<b>Faraqa</b>
1	Hurumarinta	16,231,964, 011	26,872,841,374	10,640,877,363
2	Curaarta	65,521,711, 219	63,767,542,185	1,754,169,034
3	Impress	370,742,000	370,742,000	Nil
4	Xawaaladaha	188,002,017,616	188,002,017,616	Nil
	<b>Isugaynta</b>	<b>270,126,434,846</b>	<b>279,013,143,175</b>	<b>8,886,708,329</b>

**Soo koobida xisaab-Xidhka Guud ee 2008**  
**Summary of statement of accounts, For 2008**

<b>S/n</b>	<b>Faahfaahin</b>	<b>Dakhliga SL SH</b>	<b>Kharashka SL SH</b>
1	Miisaaniyada caadiga ah 2008	233,103,883,883	247,711,179,723
2	Xisaabaadka baxsan miisaaniyada caadiga ah	270,126,434,846	279,013,143,175.22
3	Dakhliga khasnada galay ee baanka galin 2008		25,593,903
4	Dakhliga 2007 ee galay baanka	362,100	
5	Kharashka khasnada galay ee aan baanka galin,2008	5,410,553	
6	Daynta baanka ee 2008	23,513,825,419.22	
7	<b>Isku gaynta</b>	<b>526,749,916,801.22</b>	<b>526,749,916,801.22</b>

**Soo koobida daynta baanka ee 2008**

<b>s/n</b>	<b>FAAHFAAHIN</b>	<b>SL-SH</b>
01	Deynta guud ee baanka 31/12/2007	22,601,582,175.52
02	Deynta baanka ee 31/12/2008	23,513,825,419.22
	<b>Totalka guud</b>	<b>46,115,407,594.74</b>